

Warbixin

Warbixinta ku xigeenka Ergeyga gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey, ahna Iskuduwaha Arimaha Bani'aadanimo ee Soomaaliya Mr. Adam Abdelmoula, oo ku saabsan afduubka iyo dilka shaqaala caafimaad oo ka tirsanaa hay'ad maxali ah

Muqdisho, 28 Maayo 2020 – Waxaan aad uuga naxsanahay inaan maqlo in todoba qof oo shaqaala caafimaad ah oo Soomaali ah iyo qof kaloo rayid ah laga afduubay xarun caafimaad oo ay maamusho hay'ad maxali ah oo ku taala tuulada Gololey, degmada Balcad, gobolka Shabellaha Dhexe taariikhdu markey eheyd 27 Maayo. Dhammaan sadeedaasi qof waa la dilay. Wararka hordhaca ah waxey muujinayaan in ey la kulmeen geeri arxan dara ah.

Waxaan u tacsiiyeynayaa qoysaska dadka la dilay.

Weerarada lala beegsado xarumaha caafimaad iyo shaqaalaha ma aha wax la ogolaan karo waana xadgudub ka dhan ah sharciga caalamiga ee arimaha bani'aadanimo iyo habdhaqanka caadiga ah. Waa nasiib daro in weerarkan uu dhaco xili Soomaaliya ey la tacaaleyso khatarada sadexda ah ee safmarka COVID-19, fataahado iyo ajax.

Aad ayaan u cambaareynayaa falkaan arxan darada ah waxaana sugayaa baaritaan cad oo degdeg ah.

For further information, please contact:
UN OCHA Somalia Erich Opolot Ogo, Head of Communications, ogoso@un.org, +254 720 766 587 / 252 616 548 007
Mursal Ali Ahmed, Public Information Officer, mursalali@un.org, Tel: +252619150457
